# CAAWINTA HORUMARINTA HADALKA EE CARRUURTA LUQADAHA KALA DUWAN GURIGOODA LOOGA HADLO





Horumarka hadalka ee carruurta gurigooda luqadaha kala duwan looga hadlo, waxaa uu u socdaaa si la mid ah sida uu u horumaro carruurta gurigooda halka luqad looga hadlo. Si kastaba waa in inta badan xoogga la saaraa horumarinta hadalka carruurta gurigooda looga hadlo luqadaha kala duwan, si ilmuhu uu u barto dhammaan waxyaabaha luqadda la xiriira ee ay tahay in uu barto.

Waalidku waa in uu ilmaha kula hadlaa luqadda uu ku xooggan yahay ee uu sida caadiga ah ugu hadlo.: waa luqadda uu isagu ku fekero oo uu aragtidiisa ku cabbiro. Sidaas ayaana luqadda ilmuhu ay ku horumari kartaa. Waxaa aad muhiim u ah in guriga dhexdiisa ay ka jirto luqad shaqaynaysa oo ay qoyska iyo dadka ka tirsan ku wada sheekeystaan, taasoo ah mid uu ilmuhu markuu weynaado xitaa isticmaali karo. Haddii qoyska dhexdiisa looga hadlo luqado kala duwan, waa in waqti hore oo ah inta uusan ilmuhu dhalan laga fekeraa, luqadda waalidku uu doonayo in ay ilmuhu bartaan. Waxaa la soo jeedinayaa in hal qof oo dadka waaweyn ka mid ah uu si aan is badbaddal lahayn kula hadlo hal luqad oo uu doortay. Haddii waalidku ay ku hadlaan luqado kala duwan, mid kasta oo waalidiinta ka mid ah wuxuu ilmaha kula hadli karaa luqaddiisa u gaarka ah.

Ilmuhu waa in uu maqlaa islamrkaana uu si fiican u isticmaalaa luqadda la doonaayo in uu barto. Haddii nololmaalmeedka ilmaha ay ku yar tahay cid kula hadlaysa luqaddooda hooyo, waa in waalidku uu xoogga saaraa horumarka luqadda hooyo ee ilmaha si kabadan sidii caadiga ahayd. Waxaa muhiim ah in luqadda lagu tababaranaayo loo istocmaalo si dhinacyao kala duwan ah: la isku salaamo, wax la isku weydiiyo, wax lagu faalleeyo, wax loogu sheego, lagu kaftamo, wax lagu codsado, islamarkaana dareenka lagu muujiyo. Xirafadda luqadeed ee wanaagsan waxaa ay qofka ka caawinaysaa barashada luqadda finishka. Mararka qaarkood ilmuhu wuxuu maqlayaa in badan luqaddiisa hooyo ee guriga looga hadlo, laakiin in yar buu luqadda finishka maqlaa. Markaa waxaa muhiim ah in ilmaha fursad loo siiyo in uu ku tababarto luqadda finishka ah sida ugu suurtaggalsan. (tusaale ahaan. naadiyada, hiwaayadaha, saaxiibbada oo la ciyaaro).

Dhammaanba marka laga hadlaayo dhinacyada horumarinta luqadda ilmaha, waxaa aad u wanaagsan in ilmaha lala hadlo oo waliba wax lala sameeyo. La hadal ilmaha, xitaa haddii uu luqaddiisa hooyo waxyar ka fahmaayo, amaba uusan garanayn in uu ku jawaabo. Ilmuhu wuxuu baranayaa ereyada, marka lagu soo celceliyo marar badan inta lagu guda jiro arrimaha la xiriira nololmaalmeedkiisa. Marka aad samaynayso arrimaha nololmaalmeedka la xiriira ilmaha ka qaybgali, kalana hadal arrimaha ka dhacaaya agagaarkiina, la sheekeyso ilmaha, soo xusuusi wixii aad wada qabateen ee dhacay, dhegeyso ilmaha, oo la ciyaar. Maadaama qaabka ugu wanaagsan ee uu ilmuhu luqadda ku baran karo ay tahay xaaladaha wadasheekeysiga, waxaa aad u wanaagsan, in ilmuhu uu waqti yar maalinkii daawado telefishinka ama uu isticmaalo telefoonka ama tabletiga. Barnaamijyada telefishinka iyo fiidiyowyada uu ilmuhu ka daawanaayo telefoonka gacanta, waa in ay ahaadaan kuwa ku baxaaya luqadda soomaaliga.



Dhammaanba marka laga hadlaayo dhinacyada horumarinta luqadda ilmaha, waxaa aad u wanaagsan in ilmaha lala hadlo oo waliba wax lala sameeyo.

## Ilmaha yar iyo saanqaadidda (0-2 v)

Ilmaha markaa dhashay wali ma fahmaayo hadalka, laakiin waxaa wanaagsan in dadka waaweyn ay la hadlaan ilmaha yar, ayna ka jawaabaan hadaaqa iyo dhaqdhaqaaqa ilmaha yar, si ilmaha yar uu u xiiseeyo hadalka iyo xiriirka lala samaynaayo. Ilmaha waxaa aad muhiim ugu ah in uu baaritaan ku sameeyo adduunka, iyadoo dadka waawayn ay weheliyaan. Waalidku waa in ay ilmaha yar u sheegaan waxa la samaynaayo ee la xiriira nololmaalmeedka (tusaale ahaan." hadda xafaayadda ayaan beddalayaa") sidoo kale in loo magacaabo alaabaha iyo walxaha uu xiiseeynaayo. Ilmaha yar waxaa uu aad uga helaa in loo heeso oo loo qaado heesaha carruurta, iyo gaar ahaan marka uu waalidku codkiisa marba qaab u beddalaayo. Ilmaha yar wuxuu bartaa in uu fahmo ereyada kahor inta uusan hadalka soo saarin, waxaana uu dareenkiisa ku muujiyaa oohinta, dhawaaqa ama cod ahaan, shucuur wajiyeed ama baaq jir ahaaneed ah. Sida ugu badan ereyada ugu horreeya waxaa ay ka soo baxaan marka uu ilmaha yar gaaro da'da 1-ka sano



- Waxaad la ciyaartaa cayaarta loo yaqaan "kukkuu"-leikkiä (peekaboo). Tusaale ahaan waxaad wajigaaga ama kan ilmaha yar ku daboshaa. gacantaada ama maro, waxyar sug, gacmihii ka qaad wajiga/ama maradii, oo adigoo farxsan waxaad ku tiraahdaa "kukkuu".
- Waxaad isku tuurtuurtaan kubadda. Waxaad si wadajir ah u dhistaan daara dhaadheer, idinkoo isticmaalaya leegada kuuskuuska ah ee carruurtu ku ciyaarto.
- Marka ilmuhu bilaabo in uu adeegsado ereyada, waxaad u kordhisaa muujinta uu ilmaha yar samaynaayo (tusaale ahaan haddii ilmaha yar uu yiraahdo "gaari ", qofka weyn waa inuu yiraahdaa "haa halkaan waxaa socda gaari").
- Waxaad ilmaha yar la daawataa buugaagta sawirrada ee caadiga ah. Marka ugu horaysa ilmaha u tilmaan oo u magacow sawirrada.  Markii uu ilmaha yar bilaabo in uu isagu tilmaamo sawirrada, waxaa muhiim ah in aad u magacowdo sawirrada uu ilmuhu tilmaamaayo. Marka uu ilmuhu soo saaro ereyadiisa ugu horreeya, waxaad ilmaha ku soo jiidan kartaa in uu kaa dabadhaho, tusaale ahaan codadka xayawaannada iyo ereyo fudud.
- Waxaad isla samaysaan ciyaarta sawirrada la gelinaayo godadka loogu talaggalay (nuppipalapeli). Sawirrada cayaarta u magacoow, ugana faallee qaabka ciyaartu u socoto (tusaale ahaan. "Waa arrin wanaagan in aad heshay booskii booloboolada!").

---



## Da'da ciyaarta (qiyaastii 2-5 sano jir)

Marka uu da'daan jiro ilmuhu wuxuu u korayaa si dhaksho ah, wuxuuna baranayaa waxyaabo badan oo kala duwan. Marka uu jiro qiyaastii da'da ah 2-da sano, ilmuhu wuxuu bilaabayaa in uu isku xiro ereyada, uuna soo tuuro jumlado gaagaaban. Ilmuhu wuxuu si aad ah u xiiseynayaa waxa agagaarkiisa ka dhacaaya, waxaana si tartiib tartiib ah uu u fahmayaa waxyaabaha kale ee aan la xiriirin waxa laga hadlaayo. Marka uu ilmuhu koraayo, waxaa lagala hadli karaa waxyaabo badan oo kala duwan. Ilmuhu wuxuu aad uga helayaa markii qofka weyn uu u muujiyo inuu xiiseynaayo waxa uu samaynaayo. Ilmaha waxaa uu qaadan karaa waxyaabo yaryar oo hawlgacmeedyada ah, marka aad wax wada samaynaysaanna waa in aad ilmaha la sheekeysto oo kala hadasho waxa aad samaynaysaan, waxaadna la ciyaari kartaa ciyaaro kala duwan iyo kuwa la isku rakibo.

- Waxaad la ciyaartaa. Tusaale ahaan. Boombalo ama caruusadda, gawaarida, ingiriiska, ciyaarta alaabaha, ciyaaraha dharka ee kaalimaha kala duwan la qaadanaayo iyo loogooyinka. Waxaad kala hadashaa ilmaha waxa ku saabsan arrimaha nololmaalmeedkiisa, ka codso ilmaha inuu sheego waxyaabaha ku saabsan ciyaarta, waxaadna u soo jeedisaa waxyaabo cusub oo ciyaaro ah.
- U akhriya buugaagta sawirrada, kuwaasoo ay ku qoran yihiin sheekooyin yaryar. Ilmaha kala sheekeyso waxa ku saabsan sheekooyinkaas, waxna ka weydii sheekada ama su'aalaha la xiriira sawirrada.
- Wax isla sawira, isla midabeeya. Waxaad u sheegtaa waxa aad sawiraysaan, tusaale ahaan waxaad alliftaan sheeko ku saabsan sawirka.
- Bannaanka isu raaca waxaada si wadajir ah u baartaan dabeecadda iyo degaanka idinku hareereysan. Waxaad baartaan tussale ahaan. dhagaxaanta, caleemaha geedka ee midabka leh ama cayayaanka, kana wada sheekeysta waxyaabahaas oo dhan.
- Waxaad ilmaha la ciyaartaa cayaaraha kala ah midda xusuusashada iyo tan la isku rakibo (muistipelejä ja lautapelejä). Waxaadna kuwaas ka soo amaahan kartaa maktabadda.



## Da'da waxbarashada hore iyo tan iskuulka (6 sano jir)

Ilmuhu wuxuu ka hadlayaa jumlado dhaadheer, waxaana uu ka fekerayaa arrimo kala duwan oo badan, tusaale ahaan sababaha arrimaha u dhacayaan iyo waxa ka dhalanaaya. Ilmuhu wuxuu baranayaa ereyada wax tilmaamaaya sida " u dhexeeya", "la mid ah" iyo " ka hor". Marka iskuulku uu soo dhowyahay, waxaa habboon in ilmaha si tartiib ah loo baro qoraalka ereyada iyo lambarada. Ilmo badan waxay wali xilligaas ka heleyaan ciyaarta, waxaana ay luqadda ku barnayaan qaab ciyaar ah iyo xirafadda saaxiibbada.

- Waxaad akhrisaan buugaagta, ay ku yaallaan sheekooyinka dhaadheer. Waxaad carruurta ka weydiisaa sheekada arrinka ah " sababtee". Waxaad adiga iyo ilmaha ka wada fekertaan dareenka dadka matalaaya sheekooyinka iyo sababaha wax u dhacayaan iyo waxa ka dhalanaaya. Waxaad ka wada hadashaan in ilmaha uu wax khibrad gaar ah u leeyahay mowduuca laga hadlaayo iyo inkale.
- Waxaad ciyaartaan ciyaaraha ereyada (Sanapeli). Waxaad samaysaan in qofba doorkiisa uu qaato tusaale ahaan. xayawaannada, khudaarta ama ereyada ka bilaabanaya xarafka A. Waxaad wada ciyaartaan ciyaaraha erey ahaan wax lagu sharraxaayo, taasoo qof kamid ah ciyaaryahannada uu sawir ka bixinaayo arrimaha qaarkood, kuwa kalena ay qiyaasaayaan waxa arrinkaas laga wado (tusaale ahaan ciyaarta. Junior Alias).
- Waxaad ciyaartaan ciyaaraha ay khasbka tahay in sharciyada la raaco (tusaale ahaan ciyaaraha kala ah. Hippa iyo piiloleikki).
- Marka aad la hadlayso ilmaha, waxaad hadalkaaga u isticmaashaa ereyo wax muujinaaya (tusaale ahaan. "faraxsanaan", "dhib badan") iyo sidoo kale waxyaabaha dhabta ah ee dhanka fahamka ee waqtiyada tilmaamaaya (tussale ahaan. "**Saaddambe** waxaan aadaynaa hoolka dabaasha", "qaaddoyinka waxaad gelisaa khaanadda **sare**").
- Ardayga iskuulka dhigtaa waa in lagala sheekeysto waxyaabaha iskuulka lagu barto, iyadoo la adeegsanaayo luqadda guriga looga hadlo. Sidaas ayaa ereyada ilmuhu isticmaalo ee luqadda guriga looga hadlo ay ugu kordhayaan

### Ka warran haddii...

1. **Tababarka luqadda guriga ay adag tahay in loo helo waqti ku haboon oo nololmaalmeedka la xiriiray?** Tababarku waxaa uu ka koobnaan karaa dhammaan arrimaha la xiriira nololmaalmeedka. Tusaale ahaan cunto karinta iyo marka ilmaha cuntada lala cunaayo, in lagala sheekeysto, cunto noocee ah ayaa maanta la karsanayaa, xaggee waxyaabaha cuntada laga samaynaayo laga soo iibsaday, sidee cuntada loo diyaarinayaa, dhadhan sidee ah ayay leedahay, sidee ayaa miiska cuntada loogu diyaarinayaa iyo sidee ayaa jikada loo nadiifinayaa. Haddii ilmuhu uu waqtigiisa ugu badan ee maalinka uu ku qaato xannaanada carruurta ee finishka, waxaa ilmaha loo qabanqaabin karaa hiwaayad ama saaxiibbo ay la ciyaaraan oo luqaddooda hooyo ah.
2. **Ilmuhu aanay ku hadlin luqadda guriga?** Haddii ilmuhu uu jecel yahay inuu ku hadlo luqadda uu ka soo bartay xannaanada. Ma ahan in ilmaha lagu khasbo ama xooggga lagu saaro, inuu ku hadlo luqadda guriga looga hadlo. Waalidku waa in ay si iskumid ah oo aan is bedbeddel lahayn ugu hadlaan luqaddooda hooyo, ayna waxyaabaha ilmuhu u sheegaayo ugu jawaabaan luqaddoodda hooyo. Ilmaha waxaa luqadoodda hooyo loogu dhiiriggelin karaa qaab ah tusaale ahaan, in ay daawaadaan barnaamijyada carruurta ee luqaddooda hooyo ku hadlaaya, in ay xiriir la yeeshaan qaraabada, ama in la baro ilmaha arrimaha ku saabsan dhaqanka qoyska.
3. **Hadalka ilmaha si tartiib ah ayuu u horumarayaa ama ereyo cusub ma baranaayo?** Ilmaha qaarkood waxaa haysata dhibaatooyin dhanka hadalka ah iyo horumarka luqadda, si kasta oo looga caawiyo horumarinta luqadda. Marka ay xaaladdu sidaas tahay waxaa haboon in ilmaha loo raadiyo qiimaynta teraabiistaha hadalka.

Potilasohje | Foniatrian yksikkö | Hyväksytty: Ahmed Geneid 9.6.2022

Helsinki

ESPOO ESBO

Vantaa

Kuvat: Pexels